



## Xaaladaha Degdega ah

A&E (sidoo kale loo yaqaan Waaxda Gurmadka) waxa lagula tacaala xaaladaha degdeg ah ee nafta halis galinaya sida:

- Kooma/miyir beelid
- Suuxdiin
- Laab Xanuun Badan
- Neefsashada oo ku Adkaata
- Dhan-Qalal/Faalig
- Dhiigbax Badan aan la joojin-karin
- Ku fakirka Wax-is yeelid ama naf goyn.

**Haddi adiga, ama qof aad taqaano uu ku jiro xaalad degdeg ah, wac 999 ama tag A&E.**

**Xusuusnow, A&E waxa loogu talagalay xalado degdeg ah oo nafta halis gelinaysa.**

**Haddi aysan ahayn xaalad degdeg ah, la xiriir NHS 111 intaadan tagin A&E.**

**NHS**

Si aad warqadan oo afaf kale ku qoran u heshid, fadlan Sawir QR koodka hoose.

للحصول على هذا المنشور بلغات أخرى، من فضلك الرجاء مسح رمز الاستجابة السريعة أدناه.

مختلف زبانوں کے کتابچہ کے لیے نیچے دیے گئے QR کوڈ پر اسکین کریں۔

Inne wersje językowe tej ulotki dostępne poprzez skanowanie kodu QR.

For different language versions of this leaflet, please scan the QR code.

扫描以下的二维码可详细阅读本单张之中文版内容

Pentru versiuni in alte limbi ale acestui pliant, vă rugăm să scanați codul QR de mai jos.



Codso warqadan oo si kale u qoran, iimayl [bnssg.customer.service@nhs.net](mailto:bnssg.customer.service@nhs.net) ama wac 0117 900 2655.

**NHS**

## Ma dareemaysa caafimaad darro, ma u baahan tahay talo caafimaad?

warqadan ba si dhakhisa ah kuu tilmaamaysa daryeelka caafimaad ee ku haboon xaaladaada .



**Healthier Together**

Improving health and care in Bristol, North Somerset and South Gloucestershire

© BNSSG CCG 2022



## Is-Daryeelka Guriga

Booqo NHS.uk si aad uu hubisid calaamadaha xanuunada iyo sida guriga loogu daweyyo cudurrada aadka u fudud.

## Daryeelida Ilmaha Buka?

App-ka bila-lacagta ah ee NHS HANDi wuxuu siinaya waalidiinta caruurta yaryar leh talo daryeel oo faahfaahsan. Waxa heli karaa dadka isticmaala Android iyo iPhones.



## Weydii Farmesigaga

Farmesiga ayaa kaala talin kara daawooyinka, kaana caawin kara xanuunada fudud sida qufaca, hargabka, finanka iyo xasaasiyadaha.

Waxay ku siin karaan dawooyinka iyo ka horatga uurka hadii aad degdega ugu baahantahay. waxayna ku ogeysiin haddii aad u baahan tahay inaad aragto GP-gaaga.



## Helida adeegyada

Sawiro QR koodka sidaad ula socodtid adeegyada NHS ee kuu dhow. Ama booqo [bnssgccg.nhs.uk/health-services](https://bnssgccg.nhs.uk/health-services)



## La Hadal GP-gaaga

La hadal GP-gaaga haddi aad qabto xanuun ama walaac caafimaad oo mudo aan kaa tagin adigoo u tagay farmasiga booqdayna boga internetka ee NHS. Kala xiriir telefoon, internetka ama App-ka **NHS**. Haddi aadan ku qornayn GP Sawiro QR koodka sare sidaad uu ogaatid ka kugu dhow.

## Marka hore La Xiriir NHS 111

111

Markaad uu baahantahay caawimo deg deg ah, laakiin aan ahayn xaalad nafta halis gelinaysa, la xiriir NHS 111, waxaad ka heli karta internetka [111.nhs.uk](https://111.nhs.uk) ama bila-lacag ka **wac 111**.

**NHS 111** marwalba wa la heli kara.24/7 lyaga ayaa isla markiiba ku caawin doona ama ku hagi kara si aad u hesho talada saxa ee aad u baahantahay. Haddi loo baahdo, xirfadle daryeel cafimaad aya ku so wici doona oo telefoonka kaala talin kara.



## Xaruumaha Dhaawacyada fuduud iyo Daawaynta Degdega ah

Xaruumaha loogu tala galay dhaawacyada fuduud ee ku yaala xaafadaha Yate iyo Clevedon waxaay daweyyaan dhawacyada aan ahayn khatarta oo ay ka mid yihiin:

- Lafa jabka fuduud
- Gubashada Fuduud
- Murkacashada
- Fara is jarka iyo qodax galka
- Dhaawac yar oo isha gaadha

Xarunta daawaynta degdega ah ee ku taala xaafada Hengrove ee koonfurta Bristol waxaay daawaysa dhaawacyada kor ku xusan oo dhan, iyo xanuunada kale ee aan waawaynayn.

**Xaruumuhu waxay furan yihiin 8 subaxnimo ila 8 habeenimo (Clevedon 9 habeenimo ba la xidha) todabaadka oo dhan.**



**La Xiriir NHS 111 sidaad u ogaato xaruunta kuugu dhow.** toosna waad u tagi karta xaruumaha saacadaha ay furanyihiin .

**Yate MIU**, 21 West Walk, Yate BS37 4AX.

**Clevedon MIU**, Old Street, Clevedon BS21 6BS.

**Bristol UTC**, Hengrove Promenade, Bristol BS14 0DE.